WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2016

# AF-SOOMAALI

20
16

XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

**WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE**
**XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND**

**Code Number** [ ]

**Imtixaanka Fasalka 4aad 2016**
**Amin 2 Saac iyo 10 Daqiiqo Akhris ah**

# AF-SOOMAALI

## TILMAAMAHA IMTIXAANKA

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahay 11 bog
- Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Haku qorin magacaaga iyo Roll lambarkaaga toona warqadda imtixaanka
- Hubi in waraaqda lifaaqu ku dhegen tahay imtixaanka, hadday kaa maqan tahay u sheeg ilaaliyaha imtixaanka.
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah
- Jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah.

**Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:**

| QAYBTA | DHIBCAHA | QAYBTA | DHIBCAHA |
|---|---|---|---|
| Qaybta 1aad | 06 dhibcood | Qaybta 5aad | 11 dhibcood |
| Qaybta 2aad | 24 dhibcood | Qaybta 6aad | 20 dhibcood |
| Qaybta 3aad | 19 dhibcood | Qaybta 7aad | 15 dhibcood |
| Qaybta 4aad | 05 dhibcood | | |
| | | | **Wadarta: 100 Dhibcood** |

---

## Waxaa iska leh saxaha

| QAYBAHA | DHIBCO | QAYBAHA | DHIBCO |
|---|---|---|---|
| QAYBTA 1AAD | | QAYBTA 5AAD | |
| QAYBTA 2AAD | | QAYBTA 6AAD | |
| QAYBTA 3AAD | | QAYBTA 7AAD | |
| QAYBTA 4AAD | | | |
| WADAR | | | % |

SOM EXAMS


www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**AKHRI QORMADAN DABADEEDNA KA WARCELI WEYDIIMAHYA KAAGA IMAN DOONA**


Geedka Maydiga


Xabag Maydi


Xabagta Moxorka


Geedka Moxorka

## GEEDAHA XIJIGA IYO XABKOHOODA

Taariikh ahaan, waxaa xijiga geedaha xijiga la adeegsan jirey waqti fog ,oo ku siman xilliyadii ay faraaciintu Soomaaliya u yaqaaneen **bilaadul punt** oo macneheedu yahay dhulkii udugga.

Xiji waa magac guud oo kooba dhammaan dhirta dheecaankoodu xabag noqdo sida: Yagcarka,moxorka iyo xankookibka.

Markii isticmaalka maydiga iyo beeyadu ay noqdeen lama huraanka dhaqaale ayey magacii xiji sidaas ku qaateen.Hadda waxaa xiji loo yaqaan maydiga iyo beeyada oo keliya.
Xijigu waa beerta faleenka, erayga (faleen)falid ayuu ka yimid. Xijigu labo qaybood ayuu u kala baxaa:

1. **Yagcar** oo ah nooca ay ka soo baxdo xabagta **maydigu**, waana kan ugu qaali san.
2. **Moxor** oo xabagtiisa la yiraahdo **Beeyo** oo ah nooca labaad ee xijga.

Dhirtaasi iyaga ayaa iskood u baxa, ee cidi ma beerto. labadan geedba waa dhir waaweyn Berdaha bay le'eg yihiin marka ay si fiican u baxaan.

### Geedka Yagcarka (jagcar)


Waxaa maydi layiraahdaa xabagta iyo waxaa ka soo baxa geedka yagcarka marka la sarco.
Maydiga waxaa aad looga helaa labada buurood ee calmadow iyo cal miskeed,waxuuna ku baxaa labo cimilo oo kala ah kulayl iyo qabow.



Geedka maydigu ma laha xididdo dhulka ku haya ama u soo nuuga biyaha iyo macdanta ciidda ku jirta,hase yeeshee waxa uu biyaha ka qaataa caleemaha.
Geedka yagcarku waa dhadhaabo ka bax ah.lagamana helo meelaha jicsan oo dhoobada iyo carrasanka leh. ( bal eeg geedkani meesha uu ka baxay)



©PNEB,2016
SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com



GEED MOXOR AH


**Geedka moxorka**

Moxor Waa nooca labaad ee xijiga, xabagtiisana waxaa la yiraahdaa beeyo.Moxorku waxa uu ka baxaa aroorada, togaga iyo gollaha buuraha kuwaa soo leh carrosan, waana geed xidido leh waana la beeri karaa.


**Sida loo sarco yagcarka iyo moxorka**

Geedaha xijiga waxaa ayaa lagu sarcaa **Mingaaf,** meesha la sarcay ama la nafgay ayaa la yiraahdaa **hog.**

Xabagta dhadhaabaha geedka hoostiisa ah ku daadata waxaa la yiraahdaa **habto.**



HOG




MINGAAF

Xabagta xijigu waxa ay inoo leedahay waxtar badan,waxaana ka mid ah:

- Waa la dhoofiyaa waxaana ka soo noqota lacag adag.
- Waxa lagu udgiyaa guryaha iyo meelaha lagu cibaadaysto.
- Dawo ahaan ayaa loo isticmaala gaar ahaan beeyada.
- Waxaa lagu kabaa looxa doonyaha markii uu dillaac sameeyo.



LUUBAAN SOOMAALI



©PNEB,2016
SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**QAYBTA 1AAD: SHEEKO** **(06 DHIBCOOD)**

**Ka war celi dhamman weydiimahan soo socda**

1. Maxaa looga jeeda bilaadul punt ? yaase bixiyey magacan?

-------------------------------------------------------------------------------------------

-------------------------------------------------------------------------------------------

-------------------------------------------------------------------------------------------

2. Kala sheeg labada geed ee hadda loo aqoonsan yahay magaca xiji?

-------------------------------------------------------------------------------------------

-------------------------------------------------------------------------------------------

-------------------------------------------------------------------------------------------

3. Labada geed midba deegaan side ah ayuu ka baxaa? Waayo?

-------------------------------------------------------------------------------------------

-------------------------------------------------------------------------------------------

-------------------------------------------------------------------------------------------

4. Waa maxay shaqada mingaafku?

-------------------------------------------------------------------------------------------

-------------------------------------------------------------------------------------------

5. Maxaa looga jeedaa erayga habto?

-------------------------------------------------------------------------------------------

-------------------------------------------------------------------------------------------

6. Wax ka sheeg faa'iidooyinka uu xijigu u leeyahay bulshada soomaalida ah gaar ahaa ku dhex dega geedaha xijiga?

-------------------------------------------------------------------------------------------

-------------------------------------------------------------------------------------------

-------------------------------------------------------------------------------------------

-------------------------------------------------------------------------------------------



©PNEB,2016

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**QAYBTA LABAAD: NAXWE** **[24 DHIBCOOD]**

**Goobo geli jawaabta ugu saxsan ........................................................(08 dhibcood)**

1. Si loo kala saaro dhawaaqyada erayada luuqadda, waxa muhiim ah in uu qofku ka hormarsan yahay xirfadda.
   a. Xirfadda qoraalka
   b. Xirfadda dhegeysiga
   c. Xirfadda hadalka
   d. Xirfadda akhriska
2. Erayga tilmaama hawsha la qabto waxaa la yiraahdaa.
   a. Magac
   b. Tilmaame
   c. Falkaab
   d. Fal
3. Magaca ay lama maarmaanka tahay in laga bilaabo xaraf weyn waa.
   a. Magaca guud
   b. Magaca gaarka ah
   c. Magac dahsoon
   d. Magac lammaan
4. Erayga magaca xagga dame ka raaca, kana dhiga mid la isla garanayo waxaa la yiraahdaa.
   a. Qodob
   b. Tilmaame
   c. Magac u yaal
   d. Meeleeye
5. Erayga **" Is "** waa magac u yaal
   a. Ebyoon
   b. Noqod
   c. Lahaansho
   d. Tilmaame
6. Magacan lammaan ee bilaha ku dhex jira (Af-garooc) waxaa uu ka kooban yahay.
   a. Magac iyo fal
   b. Magac iyo tilmaame
   c. Magac iyo meeleeye
   d. Labo magac
7. Inan <u>yar</u> ayaa oroday,erayga hoosta ka xariiqani waa tilmaame:
   a. Lahaansho
   b. Ahaansho
   c. Tusmo
   d. Tiro
8. Shinbir ayaa <u>ciday</u> falkan hoosta ka xariiqan waxaa lagu magcaabaa.
   a. Fal gargaare
   b. Fal ma gudbe
   c. Fal ebyane
   d. Fal ma gudbe

**i. Erayadan hoos ku qoran lidkooda ku hor qor** **(04 dhibcood)**

1) Atoor ....................................................
2) Aar ....................................................
3) Milgo ....................................................
4) Arbe ....................................................



©PNEB,2016

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

***ii.*** ***Erayadan wadarta ah ka dhig keli*** **(04 dhibcood)**

1) Weylo ..........................................................
2) Kursiyo ..........................................................
3) kebdo ..........................................................
4) Tusmooyin ..........................................................

**iii.** **Ka warceli weydiimahan soo socda............................................. (08 dhibcood)**

1. Waa maxay naxawe?

----------------------------------------------------------------------------------------------------

----------------------------------------------------------------------------------------------------

2. Sheeg waxtarka uu naxwuhu u leeyahay luuqadda?

----------------------------------------------------------------------------------------------------

----------------------------------------------------------------------------------------------------

3. Waa maxay shaqada uu xiriiryuhu u hayo luuqadda inteeda kale?

----------------------------------------------------------------------------------------------------

----------------------------------------------------------------------------------------------------

4. Qor labo ka mid ah qaybaha falalka?

a. ----------------------------- b. -------------------------

**QAYBTA SADDEXAAD: HIDAHA IYO DHAQANKA {19 DHIBCOOD}**

**I. Goobo geli erayga ugu saxsan .........................................................(10 dhibcood)**

1. Markuu tooxmuu tawaawacayoo, tii yarad iyo ilmihii tebey oo ilmada tiray.heestan waxaa geela loogu heesaa marka:
   a. La waraabinayo
   b. La caraabinayo
   c. La daajinayo
   d. La dheelmayo

2. Ganka kebed aaqalka lagu qurxiyo waxaa la yiraahdaa:
   a. Barookh
   b. Bocool
   c. Bashi
   d. Beeyo

3. Faraska cas waxaa Soomaalidu u taqaan:
   a. Qaaje
   b. Bulaale
   c. Xamar
   d. Baroor



©PNEB,2016

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

4. Neefka xoolaha ah ee dhegaha yaryar waxaa loo yaqaan:
   a. Dhuko
   b. Galaalo
   c. Gabalo
   d. Deylo

5. Caanayowgan ka soo saar midka aan caanaha lo'aad ahayn:
   a. Waraasi
   b. Karuur
   c. Falan falxood
   d. Ka soofeen

6. Maqaarka lagu maalo neefka lo'da ah ee igadhka ah waxaa layiraahdaa:
   a. Gandaal
   b. Galgaal
   c. Garqaad
   d. Gorof

7. Codadkaan soo socda keeba ah codka dibiga:
   a. Dinaaho
   b. Badhaaci
   c. Dharaqaan
   d. Aleegad

8. Godol iyo gaadiid waxa u kala baxa meesi oolaadka:
   a. Geela
   b. Adhiga
   c. Fardaha
   d. Lo'da

9. Neefka lo'da ah ee aan muddo dhallin aadna u buuran waxaa la yiraahdaa:
   a. Galgaal
   b. Tebis
   c. Ameyr
   d. Muquuno

10. Guurka gabadha xooga lagu kaxaysto waxaa loo yaqaan:
   a. Heerin
   b. Dhabargaraac
   c. Hibayn
   d. Gelid

II. **Erayadan soo socda ku buuxi meelaha ay ku habboonyihiin (04 dhibcood)**

**(**Qandi, Seenyo, Maygaag, Qaroon, Maydi**)**

1. Geed weelasha lagu culo. {.......................................}
2. Xabagtiisa ayaa la dhoofiyaa. {.......................................}
3. Geed wax lagu aslo. {.......................................}
4. Rida aan geesaha lahayn. {.......................................}



©PNEB,2016
SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

III. **Weydiimahan soo socada ka warceli** **(05 dhibcood)**

1. Maxaa la yiraahdaa xariga haanta iyo aagaanka la isugu xiro si aaney u buqan?

-----------------------------------------------------------------------------------------------------

2. Maxaa la yiraahdaa weelka haragga ka samaysan ee caanaha lagu qaado?

-----------------------------------------------------------------------------------------------------

3. Sheeg magaca ay Soomaalidu u taqaan faraska midabkiisu caddaanka yahay?

-----------------------------------------------------------------------------------------------------

4. Maxaa lagu magcaabaa aqal Soomaaliga qaybtiisa qoryaha ka samaysan?

-----------------------------------------------------------------------------------------------------

5. Sheeg labo ka mid ah dhirtii ay Soomaalidii hore dharka ku mayran jireen?

-----------------------------------------------------------------------------------------------------

**QAYBTA AFRAAD: HEES HAWLEEDYO** **[05 DHIBCOOD]**

**Ku buuxi erayadan meelaha bannaan**

(Riyaha, Geela, Fardaha, Idaha, Awrta, Lo'da)

1. Sanuunta udgoon, waana saaqdaye Maadigaa sida, Oo sibraha ku leh.-----------------
2. Garoor googo'an,Oo la galab lulo,Giiro mooyee, Geelu kula maleh.---------------------
3. Garooy shamadeey sheexaleeyeey nin wax sheegiyo shirku ku ammaan----------------
4. Deylooy laxeey doolaha luloo doogga u horray----------------------------------------------
5. Afartii laguu tolay iyo weliba taartaar yaad uga tegeysaa oo kaaga toolmoon.---------

**QAYBTA SHANAAD : MAAHMAAHYO.** **[11 DHIBCOOD]**

**Maahmaahyada soo socda mid walaba ku hor qor waxa loo cuskado (06 dhibcood)**

{Siyaasadda, Midnimada, Shaqada, Hantida, Dayrada, Hubsiimada}

1. Haddii degdegsiiyo door dhalaan ,kaadsiiyana dahab bey dhalaan.
2. Gacmo wadajir bay wax ku gooyaan.____________________
3. Geed walba in gubtaa waa hoos taal.____________________
4. Meel hoo doonaysa hadal waxba kama taro.______________
5. Gacantii aadan goyn karayn waa la dhunkadaa.____________
6. Nimaan dhididini ma dhergo__________________________



©PNEB,2016
SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**Kuwan soo socda mid kasta ka keen hal maahmaah-------- (05 dhibcood)**

1. Biyaha----------------------------------------------------------------------------------------------------
2. Roobka----------------------------------------------------------------------------------------------------
3. Caanaha---------------------------------------------------------------------------------------------------
4. Dabka------------------------------------------------------------------------------------------------------
5. Sirta--------------------------------------------------------------------------------------------------------

## QAYBTA TODOBAAD: SUUGAAN { 20 DHIBCOOD}


Gabar la oran jirey Faadumo Diiriye ayaa beri waxaa soo doonay labo nin, mid wuxuu ahaa nin dhac iyo duullaan u joog ah, midka kalena wuxuu ahaa nin shaqaysta oo kalluumayste ah. Gabay ayeyna ugu tartameen inantii duulaagii ayaa yiri:



- Ina Diiriyaay heensahaa dibadda noo yaallee
- Duul lagu anfacay baannu nahay col iyo duullaane
- Iska soo dawaaf waxaan ku geyn daas karuur badane .

Kalluumaystihiina waxa uu yiri:

- Ina Diiriyaay huurigaa dibadda noo yaalle
- Duul lagu anfacay baannu nahay doorib iyo xuude
- Iska soo dawaaf waxaan ku geyn daas kalluun badane ...



**Ka warceli weydiimahan soo socda ( 20 dhibcood)**

1. Faallo yar ka qor labada nin adiga oo is barbar dhigaya midba waxa uu ku faanayo?
---------------------------------------------------------------------------------------------------------
---------------------------------------------------------------------------------------------------------
---------------------------------------------------------------------------------------------------------
---------------------------------------------------------------------------------------------------------



©PNEB,2016
SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

2. Haddii aad ahaan lahayd waalidka gabadhaas dhalay labadaa nin midkee siin lahayd gabadha?waayo?

------------------------------------------------------------------------------------------

------------------------------------------------------------------------------------------

3. Maxaa ay Soomaalidii hore ugu faani jireen dhaca iyo dagaalka?

------------------------------------------------------------------------------------------

------------------------------------------------------------------------------------------

------------------------------------------------------------------------------------------

4. Soomaalida maanta jooga iyo kuwii waagaas joogey maxay ku kala duwan yihiin, xagga dhaca iyo dagaalka?

------------------------------------------------------------------------------------------


------------------------------------------------------------------------------------------

------------------------------------------------------------------------------------------

------------------------------------------------------------------------------------------

Heestan waxaa tirisay gabar waagii hore reer xeebeed ahayd,dabadeedna uu guursadey nin geeleey ah,gabadhu waxay ninka dareensiinaysaa iney baddii iyo khayraadkeedii u xiisootay caanaha geeluna ay ka horyimaadeen, waxayna tiri:

- Kululow kalluunkii baan jantay
- Qubo qaalin geel le'eg baan jantay
- Badda bawbacdeedii baa jantay
- Ii keene aabbahay baan jantay
- Ii kariso hooyaday baan jantay



kalluunkii iyo qubadii ay gabadhu jamantay

5. Dareen sidee ah ayuu kugu samayn karaa daltabyow kugu dhaca marka aad ka fogaatid meeshii aad ku barbaartay?

------------------------------------------------------------------------------------------

------------------------------------------------------------------------------------------

------------------------------------------------------------------------------------------

------------------------------------------------------------------------------------------



©PNEB,2016
SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

6. Heesta waxaa ka muuqata kaalinta shaqo ee hooyada iyo aabbaha Soomaaliyeed,hadaba qor tuducyada muujinaya?

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

7. Sharrax kooban ka bixi sababta heestaan imtixaanka loogu soo daray?

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

**Heestaan akhri dabadeed weydiimaha ka warceli**

- Alla dheeriyaa dhuxusha ka madoobiyaa.
- Hooyaday baan arkaa lax iyo nayl bey waddaa.
- Aabbahay baan arkaa hal iyo nirig buu wadaa.

8. Baydkee ayaa tilmaamaya in aynnu Afrikaan nahay?

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

9. Beydadkee ayaa kala tilmaamaya kaalinta shaqo ee aabbaha iyo hooyada?

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

10. Sharraxaad ka bixi sida aad u fahantey shaqada ragga iyo dumarka reer guuraaga ah?

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------

-----------------------------------------------------------------------------------------------------------



©PNEB,2016
SOM EXAMS
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**QAYBTA 8AAD: CURIS** **{15 DHIBCOOD}**

**labadaan ciwaan mid dooro, dabadeedna ka qor**

1. Khayraadka baddeenna ku jira iyo kalluumaysiga sharcidarada ah.
2. Soo tahriibidda shisheeyaha iyo sii tahriibidda dhallinyarada Soomaaliyeed.

------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------
------------------------------------------------------------------------------------------------

**Dhammaad**



©PNEB,2016

SOM EXAMS

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com